# Su'aalaha Inta Badan Soo Noqnoqda (FAQ) ee Miisaaniyadda 2025

## Su'aalaha Quseeyo Miisaaniyadda Guud

Dugsiyada Saint Paul Public Schools (SPPS) waxay saadaalinayaan nusqaan dhan $150 milyan oo saameynaysa miisaaniyadda maalgelinta guud ee sannadka soo socda (FY25). Boqolkiiba intee le'eg ayay nusqaantani ka dhigan tahay markii la eego miisaaniyadda guud ee sannadka (FY24) ee hadda jirta?
Wadarta guud ee maalgelinta SPPS ee sannad-maaliyadeedka 2024 (FY24) waa $801 milyan. Oo $150 milyan waxay matalaysaa qiyaastii 19% miisaaniyadda maalgelinta guud ee hadda jira.

Boqolkiiba intee in le'eg ayaa miisaaniyadda maalgelinta guud ee SPPS lagu bixiyaa kharashka shaqaalaha?
80% miisaaniyadda maalgelinta guud waxaa lagu bixiyaa mushaharka shaqaalaha iyo dheefaha kale. Tani waxay la mid tahay iskoollada degmooyinka kale ee Minnesota.

Imisa ayay ku kacdaa in la qabto hawlaha shaqo ee SPPS halkii maalinba? (Waxaa loo beddelay 100 kun oo ah tirada ugu dhow qiyaas ahaan)
$2.8 milyan

Imisa shaqaale oo saacado buuxa shaqeeyo (FTEs) ayaa joogo SPPS?
SPPS waxay leedahay 6,137 shaqaale joogto ah oo firfircoon kuwaasoo shaqeeyo saacado buuxa iyo kuwo shaqeeyo saacado yar, (xogtii u dambeysay ee October 31, 2023).

Waa maxay kharashka ku baxo ardayga SPPS?
Xogtii ugu dambeysa ee sannad-dugsiyeedka 2021-22 waxay tiradu aheyd $20,195 ardaygiiba. Marka la barbardhigo, isku celceliska gobolka waa $15,000 ardaygiiba.

Sidee bay nusqaan dakhli u dhacday markii sharci-dejinta gobolku ay mar dhow uun waxbarashada dadweynaha geliyeen dakhli dhan $2.2 bilyan?
Dakhliga la kordhayay ee ka yimid golaha sharci-dejinta gobolka waa maalgashi soo dhaweyn ah oo aad loogu baahan yahay iskoolladeenna. In badan oo ka mid ah maalgelinta sharci-dejintu waxa ay ku xiran yihiin hindisooyin gaar ah oo waana in lagu bixiyaa sidii loogu talagalay.

Tusaale ahaan: Gobolka wuxuu bixin $2 ardaygiiba/sannadkiiba ee iskoollada si loogu iibiyo waxyaalaha caadada iyo dawada naloxone (oo loogu talagalay xad-dhaaf-u-adeegsiga daroogada oobiyoodka). Tani ma daboolayso kharashka buuxa ee alaabtan ardayda la siinayo. Baakhiga ka haray kharashaadka sida buuxda loogu maalgelinayo waajibaadkan gobolku naga doonayo wuxuu ka imaan doonaa sanduuqeenna guud. Si taa la mid ah ayay tahay maalgelinta cusub ee loogu talagalay waxbarashada gaarka ah iyo ardayda barato af-Ingiriisiga -- macnaha, maalgelinta cusub waxay dabooli doontaa qaar kharashaadka ah, laakiin ma ku filna dhammaan kharashyada looga baahan yahay in lagu bixiyo adeegyadan.

Degmada SPPS waxay helaysaa $53.8 milyan oo ah maalgelinta gobolka "cusub" ee sannad-maaliyadeedka 2024 (FY24). Isla mar ahaantaana, kharashaadka ay degmadu sannadkan maalgelisay iyo nusqaamaha dakhli waxay wadartoodu noqotay $88.2 milyan. Isku dheellitirnaan

la'aantan waxay u baahan tahay $34.4 milyan oo laga soo saaro  sanduuqa dakhliga lagu keydiyo si loo daboolo farqiga kharasheed.

Haddii uusan kharashkannagu aad u sare marin sidii loogu talagalay sannadka 2024 (FY24), qadarka kharasheed ee ay SPPS kala bixi doonto baakhiga ku jiro sanduuqa dakhliga waa la cusbooneysiin doonaa taaso qayb ka ah dib-u-eegista miisaaniyadda sannadlaha ah ee gu'ga 2024.

Sannadihii la soo dhaafay, SPPS waxay saadaalisay nusqaan dakhli balse waxay aakhirkii arrintu ku dhammaatay lacag dheeraad ah oo soo harto. Muxuu sannadkaan uga duwan yahay kuwii hore?

Sababtu waxay tahay degmada SPPS weligeed ma aysan saadaalin nusqaan dakhli oo xajmigan leh sannidii la soo dhaafay. Lacagta ESSER/ARP ee federaalka waxay dhaceysaa Settember 2024, taas oo ah inta ugu badan nusqaanta dakhli ee la saadaaliyay. Qaybta kale ee ugu weyn ee nusqaanta dakhli waa la bixitaanka $34.4 milyan oo ka mid ah baakhiga sanduuqa degmada ee sannad-maaliyadeedka 2024 (FY24). La bixitaankani wuxuu sababi doonaa baakhiga sanduuqa ku haray inuu noqdo mid wax yar ka sarreeyo keydkii ahaa 5% ee uu Guddigu ansixiyay  inaan laga hoos marin dakhli ahaan.

Haddii kharashka naga baxayo uusan noqon mid aad u sarreeyo sidii aynu saadaalinnay markii la ansixiyay miisaaniyadda FY24 ee Juun 2023, lacagta ay degmada SPPS kala bixi doonto dakhliga ku haray sanduuqa waa la sheegi doonaa si waafaqsan baakhiga haray. Dakhli walba oo si lama filaan ah nagu soo gala ayaa waxaa marka hore loo isticmaali doonaa in lagu buuxiyo baakhiga ku haray sanduuqa dakhliga.

Miisaaniyadda sannadka 2024 ee la ansixiyay bishii June 2023 waxay ku salaysneyd xogaha maaliyadeed ka hor inta uusan dhammaan kulanka golaha sharci-dejinta oo waxaana la isticmaalayay isdiiwaangelin qiyaas ku saleysan. Goorma ayaa la heli doonaa warbixinta saxda ah ee sannad-dugsiyeedka 2023 (FY23) taasoo ay ku jirto xogtii u dambeysay?

Sannad walba, degmada SPPS waxay diyaarisaa miisaaniyad naqtiin lagu sameeyay ee sannad-maaliyadeedka hadda jira ah, caadiyan bisha March. Miisaaniyadda dib loo eegay waxay ka tarjumeysaa xogo cusub laga soo billaabo markii la qaatay miisaaniyaddii (asalka aheyd) ee la ansixiyay bishii June. Nuqulkii la saxay ee ugu dambeeyay waxaa la iska rabaa sannad walba December 31-ka. Isla jeerkaas, degmada SPPS waxay dadweynaha la wadaagi kartaa lambarro aan la soo kala shaandheyn oo ka tarjumaya waxqabadka maaliyadeed ee 2023 (FY23). Degmada SPPS waxay cusbooneysiin doontaa miisaaniyadda 2024 (ee sannadka hadda socdo) bisha March 2024. Markii la gaaro bisha March, waxaynu sidoo kale heli doonnaa qiyaas aad u wanaagsan oo ku aaddan qaabka ay u ekaan doonto miisaaniyadda 2025 (FY25).

## Ilaha Maalgelinta iyo Xeyndaabyada la Xiriiro

Ma jiraan fursado ay dowladda federaalka Mareykanka ama dowlad goboleedyada ay degmada ka caawin karaan yareynta farqiga maaliyadeed?

Kama warqabno fursado dhaqaale oo dheeraad ah oo xilligan ka imanaya dowladda federaalka iyo dowladda federaalka.

Ma jiraan xaddidaadyo ama waxyaalo khasab ah oo tilmaamaya sida lacagta loo isticmaali karo?

Haa. Waxaa jira xaddidaadyo kala duwan oo go'aamiya sida lacagta loo isticmaali karo oo ay ku jiraan qandaraasyada shaqaalaha, qawaaniinta gobolka, adeegyada waajibka ah iyo shuruudo cusub oo

sharci-dejineed, kuwaas oo dhammaantood aan misana helin heerka maalgelin ee loo baahan yahay si loo daboolo kharashyada la xiriira.

Sanduuqa guud ee lacagta waa isha maalgelinta ugu dabacsan isticmaalid ahaan. Miisaaniyadda hadda jirta 2024 (FY24), miisaaniyadda guud ee loo qorsheeyay sanduuqa SPPS qiyaastii waa $801 milyan. Lacagaha kale, oo ay ku jiraan maalgelinta adeegga cuntada, maalgelinta adeegga bulshada, maalgelinta adeegga deynta iyo maalgelinta dhismaha, waxaa lagu bixin karaa oo keliya kharashyo qeexan. Wixii qeexitaan ah ee la xiriiro mid walba oo ka mid ah lacagahaas, fadlan tixraac Liiska Erey-bixinta ee Miisaaniyadda Sannad-Dugsiyeedka 2025 oo laga heli karo bogga spps.org/fy25budget.

### Canshuurta hantideyda ma waxay ku baxdaa iskoolka xaafaddayda mise degmada SPPS?

Canshuurta hantida ka soo xarooto waxaa loo isticmaalaa in lagu maalgeliyo degmada SPPS oo dhan. Canshuurta hantida ee waajibka ah waa qayb ka mid ah miisaaniyadda guud ee degmada waxaana loo qoondeeyay dugsiyada iyo barnaamijyada iyadoo lagu saleynayo xayndaabyada miisaaniyadda degmada iyo waxyaalaha mudnaanta leh. Canshuurta hantida maxalliga ah waxay maalgelisaa qiyaas ahaan 20% dakhliga sannadlaha ah ee SPPS.

## Qorshaha Gargaarka Mareykanka (ARP)

### Boqolkiiba intee in le'eg oo ka mid ah miisaaniyadda maalgelinta guud ee SPPS ayaa ka mid ah maalgelinta laga helay Qorshaha Samatabixinta Mareykanka (ARP)?

Qaddan dhan 14% ( oo ah $114 milyan ee) miisaaniyadda guud ee maalgelinta 2024 ee degmada waxay ka timid Qorshaha Samatabixinta Mareykanka. Maalgelintan federaalka ah ee halka mar ah waxay dhacaysaa bisha September 2024, mana jirto maalgelin kale oo lagu beddeli doono midda dhaceyso. Wax badan ka ogow sida lacagtan loo isticmaalo bogga spps.org.ARP.

### Maadaama ay dhammaanayso lacagta halka mar la siiyay degmada, sidee ayaad mudnaanta u siin doontaan barnaamijyada, shaqaalaha, iwm si loo sii wado iyadoo la isticmaalayo lacagta hadda la heli karo?

Degmada SPPS waxay ku dadaaleysaa inay bixiso waxbarashada ugu tayada sarreysa ee suurtogalka ah iyada oo la isticmaalayo miisaaniyaddeena la heli karo iyo shaqaalaha. Waxyaalaha mudnaanta u ah miisaaniyadda waxaa lagu go'aamiyay siyaabo kala duwan sannadihii la soo dhaafay. Sannadkan:

1. Waxaan billownay inaan ururinno waxyaalaha mudnaanta u leh waxbarashada. bulshadeenna. Waxyaalahan mudnaanta waxbarasho u leh bulshada waxay aasaas u yihiin sida mudnaanta loo siiyo dhaqaalaheena noociisa aysan wax shuruudo ah ku xirnayn.
2. Waxaan dib u eegi doonnaa xogta ku xeeran barnaamijyada iyo adeegyada iyadoo diiradda la saarayo kuwa muujiyay horumar ku aaddan natiijooyinkeenna muddada dheer ee ardayda.
3. Waxaan markaa mudnaanta siin doonnaa barnaamijyadaas iyo adeegyadaas muujiyo: Heerarka ugu sarreeya ee waxtarka ama ififaale wanaagsan leh; waafaqsan waxyaalaha mudnaanta waxbarashada u leh bulshadeena; iyo adeegyada la socon karo kharash ahaan xayndaabkeenna miisaaniyadda. Tani waxay go'aamin doontaa waxa aynu sii wadi doonno iyo inta shaqaale ee aynu u baahan doonno 2025.

### Haddii lacagaha ARP aysan dib u soo noqoneynin, maxay tahay sababta aan uga fiirsaneyno sii wadista barnaamijyada maalgelinta ARP wixii ka baxsan 2024?

Qaar ka mid ah barnaamijyada la billaabay iyadoo la isticmaalayo lacagaha ARP ayaa la caddeeyay inay sare u qaadaan natiijooyinka ardayda. Isla mar ahaantaana, waxaa jira qaar ka mid ah barnaamijyo muddo dheer socday oo aan wax saameyn ah yeelan. Sababtan awgeed, waxaa muhiim ah inaan si buuxda u qiimeyno dhammaan barnaamijyadeena si aan u go'aaminno waxa ugu fiican ee buuxin doona baahiyaha iyo waxyaalaha mudnaanta u ah bulshadeenna, hagaajinta natiijooyinka ardayda, iyo waafajinta qorshaheena istiraatiijiyadeed. Iyadoo lagu saleynayo qiimeyntan, taasoo ay weheliso waxyaalaha mudnaanta u leh bulshada, waxaan go'aamin doonnaa barnaamijyada ay tahay inay sii socdaan iyo kuwa la joojin doono.

### Lacagta ARP ma loo isticmaalay waxyaabo aan ahayn waxyaabaha dhismaha la xiriiro ama kharash hal-mar ah?

Haa. Degmada SPPS waxay raacday tilmaamaha kharashaadka ee ka yimid waaxaha waxbarashada federaalka iyo gobolka si ay gacan uga geystaan maalgelinta barnaamijka kaas oo wax ka qabanayay dhowr arrimood oo la xiriira saameynta COVID-19, taasoo ay ku jireen caafimaadka maskaxda iyo taageerada waxbarashada. Qiyaastii 30% lacagaha ARP ayaa waxaa lagu kharash gareeyay waxyaalo hal-mar ah. Halkan ka eeg bogga xogta miisaaniyadda ARP: spps.org/Page/45780.

### Haddii ay jiraan lacago aan la isticmaalin oo ka haray alaabtii miisaaniyaddooda la qorsheeyay sannadkii hore, maxaa ku dhacaya lacagahaas?

Si la mid ah maareynta miisaaniyadda shaqsiga iyo qoyska, lacagaha aynu qorsheynay inaan isticmaalno laakiin aan la isticmaalin waxay ku jiraysaa sanduuqa dakhliga. Sidan in la sameeyo waxay anfaceysaa sanduuqa dakhliga, waxayna kor u qaadeysaa xasilloonida maaliyadeed, iyo qiimey caafimaad leh xagga deynta.

## Is-Qoritaanka

### Sideen u qorsheynaa isqorista ardayda ee sannad walba?

SPPS waxay eegtaa xogo kala duwan oo ay ku jiraan heerarka dhalashada, furitaanka ama xiritaanka iskool jaartar ah, isbeddellada dadka xaafadaha (dadka guuraya/soo guuraya, iwm.), iyo isbeddellada isqorista ee caadiyan sannado hore la arki jiray si ay u sameeyaan saadaalin ku aaddan sannad-dugsiyeedka soo socda. Saadaashu waxay caadi ahaan ku dhowdahay qiyaastii 0.5-2% isqoridda dhabta ah ee la helo October 1 sannad walba.

### Imisa arday oo PreK-12 ah ayaa ka diiwaangashan SPPS (SY23-24 hordhac ah)?

32,789 waa tirinta diiwaangelinta hordhaca ah ee ardayda dhigato PreK-12 markii u dambeysay September 22, 2023. Tirinta rasmiga ah ee October 1 waxaa la heli doonaa January 2024.

### Sidee isqorista ardayda u saameeysaa miisaaniyadda?

Isiiwaangelinta waa shayga koowaad ee dhaqaajiyo miisaaniyadda la siiyo iskoollada degmada. Ku dhowaad dhammaan dakhliga waxaa lala xiriiriyaa ardayda ka qoran iskoollada, oo ay ku jiraan kaalmada gobolka iyo canshuurta hantida maxalliga ah. Ka dib marka la sii daayo tirada ardayda ee rasmiga ah ee October 1, miisaaniyadda la saxay waxay ka tarjumi doontaa tirada ardayda diiwaangashan ee dhabta ah.

### Maxay SPPS ka qabaneysaa si looga hortago hoos-u-dhaca tirada ardayda diiwaangashan?

SPPS waxay leedahay istaraatiijiyado dhowr ah oo u degsan, looguna talagalay qaadashada iyo xagsashada arday cusub iyo qoysas. Waxaan diiradda saarnaa bixinta barnaamijyo iyo adeegyo tayo sare leh oo daboolaya baahiyaha bulshadeenna. Waxaan si joogto ah u codsannaa talooyin oo falanqaynaa xogta si aan u gaarno go'aano xog ku saleysan oo ku saabsan waxa saameeya qoysaska inay doortaan oo ay sii joogaan SPPS.

Isku celcelis ahaan, 60% dadka gaaray da'da iskoolka ee ku nool St. Paul waxay dhigtaan Saint Paul Public Schools. 85% ardayda waxay joogaan degmada SPPS ku jiraan hal fasal ilaa kan xiga. Waxyaabaha kale ee saameeya diiwaangelinta waxaa ka mid ah tartan kordhay oo ka yimid dugsiyada jaartarka ah iyo kuwa aan dowliga ahayn, iyo hoos u dhaca heerka dhalasho ee degmada.

Iyadoo lagu saleynayo xogta tirada diiwaangashan ee hordhaca ah, SPPS way buuxisay hadafkeeda ahaa xasillinta tirada ardaydeenna diiwaangashan (ahna hoos u dhac ah 1.5% ama wax ka yar) ee sannad-dugsiyeedka 2023-24. Qaar ka mid ah dedaallada arday qorista iyo haysashada ee degmada waxaa ka mid ah Bandhigga Xulashada Iskoolka ee sannadlaha ah, Hagaha Xulashada Iskoollada, dedaallada suuqgeynta dhijitaalka ah iyo warbaahin wax faafisa. Intaas waxaa sii dheer, lix iskool ayaa helay lacago suuq geyn gooni u ah si kor loogu qaado isdiiwaangalintooda sannad-dugsiyeedka 2024-25.

## Habraaca Go'aan-qaadashada

### Sidee loo isticmaali doonaa talo-bixintayda ku aaddan hannaanka go'aanka miisaaniyadda?

Degmada SPPS waxay uruurisay, oo ayna sii waddaa inay ururiso oo falanqeyso, talooyinka ardayda, qoysaska, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada si ay ugu wargeliyaan miisaaniyadda 2025. Iyadoo loo marayo hannaankan, bulshada SPPS waxay aqoonsatay tiro mudnaan ah kuwaas oo ah kuwa ugu muhiimsan bulshadeenna (tusaale ahaan amniga, dareenka ka mid ahaanshaha iskoolka, iskoollo ka tarjumo dhaqamada ardayda). Haddii ay suurtagal tahay, hoggaamiyeyaasha SPPS waxay sameyn doonaan go'aanno miisaaniyadeed waafaqsan waxyaalahan mudnaanta u leh miisaaniyadda FY25.

Dhammaan daneeyayaasha waxay sii wadi karaan inay bixiyaan talobixin iyadoo la adeegsanayo Foomka FY25 ee ah Talobixinta Miisaaniyadda 2025 kaasoo ku jiro bogga spps.org/Domain/20706.

### Yaa gaarayo go'aamada kama dambaysta ah?

Isu-Duwaha Guud iyo Kooxda Fulanta ee Hoggaanka Sare waxay gaari doonaan go'aannada ugu dambeeya ee miisaaniyadda 2025 iyadoo lala tashanayo madaxda, hoggaamiyeyaasha degmada, iyo Guddiga Waxbarashada (BOE). Ka dibna go'aannadaas waxaa loo rogi doonaa talo-soo-jeedin loo soo bandhigayo Guddiga Waxbarashada (BOE). Guddiga Waxbarashada (BOE) waa inuu codeeyaa si loo qaato miisaaniyadda ugu dambeyn June 30, 2024.

### Waa sidee jadwalka lagu qaadanayo go'aan kama dambeys ah?

Jadwalka hannaanka loo marayo miisaaniyadda 2025 waxaa laga heli karaa bogga spps.org/fy25budget.

### Maxaa ku jiro isla markaana ka baxsan hannaankan?

Dhammaan barnaamijyada, iskaashiga, hindisooyinka istiraatiijiyadeed iyo "ballanqaadyada hawlaha" kale ee aan waajibka aheyn ayaa hadda lagu wadaa qiimeyn qayb ka ah hannaankan. Si loo gaaro miisaaniyad isku dheellitiran sannadka 2025, degmada SPPS waxay u baahan doontaa inay joojiso barnaamijyada qaarkood iyo inay hoos u dhigto tirada shaqaalaha degmadu shaqaalaysiiso.

**Ma jiraan waaxyo, jagooyin shaqaale, ama barnaamijyo laga reebayo in la qiimeeyo iyagoo loo tixgelinayo inay noqdaan meelaha suurtagalka ah ee laga sameyn karo dhimista tirada shaqaalaha iyo yareynta kharashyada baxo.** Tan waxaa ka mid ah shaqaalaha iyo barnaamijyada degmada. Wax walba waxaa lagu qiimeyn waxyaalaha mudnaanta u leh bulshada iyo xogta ku saabsan natiijooyinka ardayda.

Ma garanayno saameynta ay tani ku yeelan doonto iskoolladeenna xilligan. Waxaan filaneynaa in iskoolladu ay heli doonaan miisaaniyaddooda dhammaadka February. Wax walba oo ah wax ka beddelka shaqaalaha ama barnaamijka degmada waxaa la sameyn doonaa iyadoo la raacayo luuqadda qandaraaska shaqaalaha. Xiritaanka iskoollada kuma jirto baaxadda hannaankan.

## Hawlgelinta Dadweynaha

### Qaabkee u raadiseen talobixinta bulshada, gaar ahaan waaliddiinta iyo ardayda, ee ku aaddan waxyaalaha mudnaantooda u leh waxbarashadooda?

- Kulamada ardayda ee ka dhacay 8 dugsiyo sare oo SPPS ah (Gu'ga 2023)
- Kulamada Bulshada ee Hay'adda Marnita's Table (Gu'ga 2023)
- Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada iyo Kulamada Miisaaniyadda (Dayrta 2023)
- Kulamada miisaaniyadda ee shaqaalaha (Dayrta 2023)
- Ra'yi-uruurin lagu ogaanayo waxyaalaha mudnaanta u leh (Qoysaska, Shaqaalaha, ardayda dhigato fasallada 6-12, Deyrta 2023)

Guud ahaan, waxaynu soo uruurinnay talo-bixin ka timid in ka badan 10,000 oo ah daneeyayaasha degmada (10,739). Dulmar guud oo wadahadalladaan ah bogga [spps.org/fy25budget](spps.org/fy25budget) ayaa laga heli karaa.

### Sidee baa talo-bixintii ka soo baxday ra'yi-uruurintii quseysay waxyaalaha mudnaanta u leh bulshadeenna loogu rogi doonaa mid u jihaysata dhanka maaliyadda?

Miisaaniyaddu waa mid ka tarjumaysa waxyaalaha mudnaanta u leh waxbarashada bulshadeenna. Tusaale ahaan, waxaan ognahay in amnigu mudnaanta ugu sarreysa u yahay dhammaan kooxaheenna ah daneeyayaasha degmada. Taasi waxay ka dhigan tahay, haddii ay tahay inaan kala dooranno maalgelinta shaqaalaha amniga ama casriyeynta aaladda taleefankeenna, waxaynu dooran lahayn inaan maalgelinno shaqaalaha amniga.

Marka lagu daro waxyaalaha mudnaanta leh, waxaan sidoo kale si qoto dheer ugu qiimaynaynaa natiijooyinkayaga ardayda si aynu mudnaanta u siinno barnaamijyadaas iyo adeegyadaas la xaqiijiyay inay ka caawiyaan ardaydeenna inay gaaraan natiijooyin muddada-dheer socdo ee ku xusan qorshaha istiraatiijiyadeed ee SPPS Achieves.

Waa labadan shardi (mudnaanta waxbarasho iyo natiijooyinka ardayga) oo ay weheliyaan kharashyadeenna waajibka nagu ah waxa dhaqaajin doona miisaaniyadda 2025.

### Ma jireen kulamo la dhageysanayo ama taleefanno loo diray shaqaalaha iskoolka?

Kulamada wadahallada bulshada waxay u furnaayeen dhammaan daneeyayaasha oo ay ku jiraan shaqaalaha. Foomka ra'yi-uruurinta shaqaalaha ayaa sidoo kale loo diray dhammaan shaqaalaha. Intaa waxaa dheer, maamulayaasha iskoolladu waxay kulamo miisaaniyadeed la yeesheen shaqaalahooda si ay u helaan fahan loo siman yahay oo ku saabsan miisaaniyadda hadda jirta iyo midda la saadaalinayo

sannadka 2025. Isu Duwaha Guud wuxuu leeyahay jadwal taxan oo ah inuu booqdo iskoollada oo wuxuuna la kulmaa shaqaalaha iskoolka ugu yaraan toddobaad walba.

### Muxuu noqon doonaa hannaanka lagu xaqiijinayo in la sii wado uruurinta talo-bixinta bulshada iyo shaqaalaha?

Foomka talo-bixinta ee bogga miisaaniyadda 2025 waa hal qaab oo lagu uruurinayo talo-bixinta. Maamulayaasha iskoollada iyo hoggaamiyeyaasha kale ee degmada waxay sii wadi doonaan inay qayb ka noqdaan hannaanka go'aan gaaridda. Waxaa sidoo kale naga go'an inaan bulshada siinno wararka cusub oo bille ah iyadoo loogu soo dirayo iimayl ay qoysaska iyo shaqaalaha SPPS u xusheen inay yihiin habka ay doorbidayaan kaasoo ay ku sheegeen ra'yi-uruurintii ay buuxiyeen iyo kulamadii wadahadallada ee ay ka soo qeybgaleen.

## Su'aalaha Shaqaalaha

### Dhammaan kooxaha gorgortanka shaqaalaha ma heli doonaan koror ah 6% oo la mid ah kooxda shaqaale ee Isu Duwaha Guud (ee Aan la matalin)?

Guddiga Waxbarashada ayaa  kulan dhacay August 22, 2023 ku ansixiyay kordhinta mushahar halka mar ah ee 6% ee kooxda aan wakiil metelo haysan (oo hore loogu magac daray xafiiska Isu Duwaha Guud). Go'aankani wuxuu ku salaysnaa daraasad dhammaystiran oo ku aaddaneyd mushahaar iyo dheefaha taasoo ay sameysay xarunta Evergreen Solutions. Waxay xaruntani ogaatay in mushaharka kooxdan uu ka hooseeyo heerka suuqa marka loo barbardhigo shaqo-bixiyeyaasha la midka ah ee gobolka. Natiijooyinka xarunta Evergreen Solution iyo talooyinkoodaba waxaa laga heli karaa Buugga Guddiga Waxabarashada August 22 laga billaabo bogga 163.

Kooxda aan wakiilka metela laheyn waxaa ka mid ah kaaliyaasha Isu Duwaha Guud, madaxda sare ee waaxaha, agaasimayaasha waaxaha, iyo maamulayaasha kale ee degmada. Kuma jiro Isu Duwaha Guud. **Kooxdan kama tirsano urur shaqaale mana hesho kordhinta mushaharka ee sannadlaha ah (mushaarkaasoo ku saleysan sannadaha uu qofku adeegay) ama isbeddelka dhanka cilmi (mushahar-kordhin ku timid waxbarashada dheeraadka ah ee uu shaqaaluhu dhammeystiro).** Mushaharka kooxda aan wakiilka metelo haysan ayaa weligeedba aheyd mid isku mid ah laga soo billaabo 2013-2021, iyadoo keliya wax yar la kordhiyay ka dib qiimaha kororka maciishadda nolosha (COLA) oo waxay kordhintu aheyd keliya 1.5%  sannadaha 2021 iyo 2022. Taa beddelkeeda, shaqaalaha SPPS badankoodu waxay u qalmaan kordhinta mushaharka sannadlaha ah marka lagu daro maciishadda nolosha (COLA) ee sannadlaha loo xisaabiyo. Shaqaalaha laysinka haysta ayaa sidoo kale u qalma isbeddelka mushaharka markii  ay dhammaystirtaan qaadashada waxbarashada dheeraadka ah. Dhammaan kordhinta maciishadda la xiriirto ee COLA waa in ay ansixiyaan Guddiga Waxbarashada.

### Dalladda "Adeegyada Taageerada Maamulka" ma waxaa soo hoos gelayo qof walba oo ka shaqeeyo 360 Colborne iyo 1930 Como ee ay hawshoodu ku taxalluqdo tacliinta? Dalladan ma waxaa ka mid ah shaqaalaha Xafiiska Ganacsiga, Xafiiska Shaqaalaysiinta, iwm?

Haa, dalladdaan waxaa ka mid ah inta badan shaqaalaha SPPS ee joogo 360 Colborne, 1930 Como (EOS), 1780 W. 7th, iwm. Dalladdaan waxaa ka mid ah Guddiga Waxbarashada, Maaliyadda, Xafiiska Shaqaalaysiinta, xafiiska Isgaarsiinta, xafiiska La-Shaqeynta Qoysaska, qeybta Amniga, Waxbarashada iyo Waxbarashada, iyo shaqaalaha kale ee waaxda, iyo sidoo kale maamulayaasha iskoollada.

### Degmadu waxay leedahay miisaaniyad dhan $ 1bilyan waxayna u qoondeysay oo keliya $ 17.9 milyan oo dheeraad ah DHAMMAAN qandaraasyada shaqaalaha. Sideed u xalliseen $17.9 milyan si aad u dejisaan dhammaan qandaraasyada marka qandaraasyadaas ay socdaan 2-3 sano?

Lacagtani waxay ku saleysan tahay koror ah 3.1% oo quseeyo dhammaan kharashyada la xiriira mushaharka iyo dheefaha la siiyo dhammaan kooxaha shaqaalaha. Qoondeyntani waxay ka imaan doontaa sanduuqa guud ee dakhliga, kaasoo qiyaastii 80% ka mid ah miisaaniyadda aasaasiga ah ee sannadka 2023 (waa $580 milyan saadaasha miisaaniyadda 2024).

### Marka aad tiraahdaan waxyaabaha soo socda: 76% kharashkeenna wuxuu si toos ah ugu baxaa barnaamijyada iyo adeegyada ardayda, sidee arrintani u barbar dhigmi kartaa degmooyinka kale?

Si dhammaan ardayda loo siiyo waxbarasho tayo sare leh iyo adeegyo la xiriira baahidooda, degmada SPPS waxay ardaygiiba ku bixisay isku celcelis ahaan $20,195 sannad-maaliyadeedka 21-22. Isku celceliska gobolka waa $ 15,000. Tani waa hab isku dheellitiran oo waafaqsan sida ay ku socdaan hawlaha gobolka oo dhan iyo qaababka kharashaadka la galo.

### Shaqaaluhu wax talo ah ma ku leeyihiin haddii la kala dirayo barnaamijkooda ama la joojinayo shaqadooda?

Shaqaalaha iskoolka iyo waaxda ma sameyn doonaan go'aamada noocaan ah. Wareegga 1 ee ka wadahadalka miisaaniyadda waxaa ka mid ahaa ra'yi-uruurinta shaqaalaha iyo shan kulan oo dadweyaha la qabtay October iyo November. Haddii aad ka qaybqaadatay kulamadaan, taladaada waxaa loo isticmaali doonaa qayb ka mid ah hannaanka go'aan qaadashada.

Waxaa naga go'an inaynu bulshada la wadaagno wararka cusub ee miisaaniyadda 2025 bil walba. Xubnaha bulshada oo ay shaqaaluhu ka mid yihiin waxay soo gudbin karaan talo-bixin iyo su'aalo dheeraad ah iyagoo soo marinayo foomka talo-bixinta ee bogga spps.org/fy25budget. Waynu sii wadi doonnaa inaan bulshada siinno wararkii u dambeeyay markii xogaha la uruurinayo oo go'aanna la gaarayo.

### Goorma ayaa la sameyn doonaa go'aamada quseeyo barnaamijka/booska shaqaalaha?

Waxaan filaneynaa in iskoolladu ay heli doonaan miisaaniyaddooda ugu dambeyn March 2024. Wax walba oo yareynta tirada shaqaalaha quseeyo waa in la sameeyaa iyadoo la raacayo luuqadda qandaraaska shaqaalaha. Jadwalka xilliga la gaarayo go'aanka miisaaniyadda waxaa laga heli karaa bogga spps.org/fy25budget.

### Ma nala wadaagi doontaan xogaha waxyaalaha mudnaanta leh ee laga soo uruuriyay daneeyayaasha kala duwan ee degmada?

Haa, dulmar ah waxyaalaha mudnaanta u leh bulshada ayaa lala wadaagay dhammaan shaqaalaha, qoysaska iyo Guddiga Waxbarashada November 30, 2023, oo waxaana sidoo kale laga heli karaa halkan.